Farshaxanka Dhagaxkuyaalka[1] Laasgeel
Dr. Jama Musse Jama

Laasgeel waxa ay u jirtaa Hargeysa in ku dhow 50km xagga Waqooyi Bari, waxana ay 5km Waqooyi kaga beegan tahay tuulada Dhubato. Waxa dhagaxda Laasgeel ku yaal shaxannada sawirgacmeedka ah ee Afrika kuwa ugu dhowrsoon ee ka badbaaday hagardaamada aadamaha iyo nuglaynta dabeecaddu u gaysato shaxannada sooyaalka ah. Waxa lagu qiyaasaa 5,000-11,000 oo sannadood ka hor in la sameeyey farshaxankan dhagaxkuyaalka ah, oo u badan xoolo lo' ah, qaab bini'aadam, iyo xayawaanno kale oo lagu dul xardhay dhagaxa ku dhowrsoon xorfadaha buurta Laasgeel. Waa goobta ugu caansan kolka ay noqoto taariikhda soojireenka Somaliland, waana goob u muhiim ah dalxiiska oo soo jiidatay indhaha adduunwaynaha.


Sawirka © Yusuf Dahir, 2020

Tan iyo dib-u-soo-helitaankeedii sannadkii 2002[2] oo ay koox isugu jirta cilmibaadheyaal Faransiis ah iyo sahamiyeyaal u dhashay Somaliland, u sheegeen dunida, wax ay indhaha adduunka ku soo jeediyeen goobtan Laasgeel, oo heshay sumcad badan oo adduunwaynaha ah, waxaana jira hadda dhawaaqyo isa soo taraya oo loogu talagalay in loo aqoonsado Goobta Dhaxalka Dunida (GDhD) ee UNESCO. Mar hore ayay hirgeli lahayd in Laasgeel loo diiwaangeliyo GDhD, waxa se ka mid ah caqabadaha ugu waaweyn ee hortaagan arrinka,

[1] Ereyga *Farshaxanka Dhagax-ku-yaal ah* waa ereyga Af-ingiriisida ah ee *Rock Art Painting*. Ka eeg *Taxa Ereybixinta Arrimaha Dalxiiska iyo Aarkiyoolojiga*, Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa (2020).
[2] Dib u soo helitaanka Laasgeel waxa loo ogsoonyahay degalbaadheyaal Faransiis ah oo ay la socdeen Sahamiyeyaal degaanka aad u yaqaannay, waxana hagayay cilmibaadheyaasha Xavier Gutherz.

aqoonsi la’aanta Jamhuuriyadda Somaliland, oo aan ku lahayn kursi iyo cod toona UNESCO.

Baadhitaan lagu sameeyey dadka soo booqday ee sida sharciga waafaqsan u tagay shantii sannadood ee u danbaysay, waxa ay inna tusaysaa in Laasgeel ay tagaan ajaanibku inta badan oo booqadashada muwaadiniinta Somaliland ay ku yar yihiin. In ku dhow 70% dadka soo booqdaa waa ajaanib, kuwaas oo lacagta ka soo xerootay sannadihii u danbeeyey ay u dhaxayso 18,000-20,000USD sannadkii oo toos ah uga timaadda sicirka shatiga oggolaanshaha. Lacagtaas waxa dheer kharashaadka nololeed ee dalxiiska goobta, nooliga gawaadhida iyo hagayaasha dalxiis ee loo kireysto tegitaanka, iyo waliba dalkugalka iyo ka dukaansiga magaalooyinka ee dadka u yimaadda dalka in ay soo booqdaan Laasgeel. Arrinkaasi waxa uu muujinayaa in Laasgeel kaalin waxkuool ah kaga jirto koboca dhaqaalaha ka soo xerooda dalxiiska. Wasiirka Dalxiiska, Mudane Maxamuud Xasan Sacad "Saajin" waxa uu ii sheegay in wasaaraddu sannadkii 2019kii horraantiisii soo jeedisey in dalkugalka loo fududeeyo dadka imanaya Somaliland oo laga siiyo xudduudda soo gelitaantka (Visa on arrival), taas oo la qaatay lana hirgeliyey oo xoojisey in dad badani yimaaddaan iyagoo dalxiis ah, rajo fiicanna uu ka qabo in Somaliland dhaqaaleheeda kobox uu dalxiisku wax wayn ka noqon doono.

Hadda oo ay adduunka kala xidhay sadhada KOOFIDH19, waxa is taagtey booqashadii goobtaas, oo macneheedu yahay in dakhligii ka soo geli jirey dawladda dhexe uu yaraaday, islmarkaana dhaqdhaqaaq nololeedkii goobta Laasgeel iyo tuulada Dhubato si dadban uga soo gelijirey ay sadhadu saamaysay.

Maqaalkani waxa uu dhiirrigelinayaa in muwaadiniintu bartaan dhulka loo dalxiistago guud ahaan, gaar ahaanna Laasgeel oo ku taalla meel si fudud lagu gaadhi karo, ay soo booqdaan si joogto ah.


Sawirka © HCC, 2020

*Sidee loo tegi karaa Laasgeel?*

Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska waxa ka furan xafiis u gaar ah oo laga qaato waraaqda fasaxa booqashada. Xafiisku waxa uu furanyahay isla xilliga xafiisyada wasaaraddu furan yihiin oo dhan, halkaas oo lagu bixinayo lacagta fasaxa booqashada. Qiimaha hadda u go'an waa 25USD qofkii ajaanib ah iyo 10USD qofkii muwaadin ah, lacagtaa oo toos u qabanaysa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda. Waraaqdaasi waxa nuqul ka mid ah lagaaga reebayaa albaabka gelitaanka ee goobta dalxiiska.

*Maxaan lagu arki karaa Laasgeel?*

Goobta Dalxiiska ee Laasgeel waxa ay ka koobantahay 7 guri oo ay in ku dhow 250 sawirgacemeed oo isugu jira xoolodhaqato qaab biniaadam leh, lo' lab iyo dheddigba leh balse u badan sac, ey amase yey, masas, geri iyo riyo, oo ku dul xardhan dhagax dabiici ah. Quruxda Laasgeel waxa sii kaabaya deegaanka bannaan ee kolka aad buurta fuushantahay si ilwaad leh naftu ugu raaxaysanayo, islamarkaana aad dareemayso degganaansho nafsi iyo hawo caafimaad. Waxa jooga shaqaale Wasaaradda ka tirsan oo aqoon u leh taariikhda iyo xaradh-faneedka oo kugu wehelinaya socodka kuuna sharxaya goobaha kala duwan iyo sawirrada kala duwan ee goobta.



Sawirka © Yusuf Dahir, 2020

Sawirrada badankoodu waxa ay ku midabaysan yihiin caddaan, casaan, huruud dilloon, iyo madow. Sawirrad qaarkood ayaa hal-midabyaale ah (madow iyo caddaan), waxana dadka deggan Laasgeel ay aaminsanyihiin in goob ku dhow buurta ay tahay halkii lagu qooshi jirey iskudarka midabyada, waayo waxa ku yaalla dhagax kolka la xoqo oo la qooyo u ekaanayay midabka ay sawirradu ku midabaysan yihihiin.

Laasgeel agagaarkeeda waxa lagu arki karaa xabaalo gaboobay, kala kaan ah oo u eeg in ay xilliyo aad u kala fog ku abtirsanayaan, taasina waxa ay ka turjumi karaysaa ilbaxnimooyinka kala kaanka ah ee isaga danbeeyey goobta, waxana ay u baahan tahay baadhitaan cilmi oo ku saabsan xagga taariikhda.


*Maxaan u baahanahay si aan u booqdo?*
Laasgeel ma laha goob laga iibsan karo biyo iyo cunto, kolkaa waa inaad sii qaadataa biyaha aad cabbayso. Qiyaastii laba saacadood in aad kusoo wada booqato ayaa kugu filan, kuna nasato. 5ta Km ee waddada aad ka leexanaysaa ma aha mid dhiibsan, sidaa daraadeed waxa aad u baahantahay gaadhi ka bixi kara waddada, waxana muhiim ah in aanad ku raagin galabtii oo fiidkii aanu kuugu madoobaan soo socdku, islamarkaana aad uga bogato dalxiiska. Sii qaado kabo ku habboon socodka oo deggan, oo aan ku cidhiidhyin. Kamarad ama teleefon uu baytarigiisu kuu buuxo sii qaado, si aad xusuus uga soo reebto safarkaaga.

*Yaa tegi kara Laasgeel?*
Laasgeel waa goob ku habboon booqashada cid walba, carruur iyo waayeel. Waa goob dugsiyadu dalxiis wadareed ardaydooda u gayn karaan sannadkiiba mar, waana goob ay qoysasku iyaga oo isu dhammaystiran waalid iyo carruur soo booqan karaan. Hase yeeshee, waxa jira dhagax jaranjaraysan oo ku gayn doonaa godadka farshaxan dhagax-ku-yaal ku urursanyihiin. Waxana dhici karta, waa

nasiib-darro e, in dadka lugaha ka naafada ah iyo kuwa tamartooda jidheed liidato aanay fursaddaas heli karin. Si kastaba ha ahaatee, kama qadayaan quruxda dabiiciga ah ee goobta.

*Maxay tahay in aan la samaynin?*

Waxa ugu horreeya ee qofka dalxiiska ahi iska ilaalinayaa waa in booqashadu ay dhibaato u gaysato farshaxanka, iyo guud ahaan deegaanka goobta, waana muhim in la ilaaliyo nadaafaddeeda. Ha ka ga iman caagadaha aad biyaha kusii qaadatay, waraaqo, baco ama qashin kale oo ka soo hadhay wax aad goobta ku adeegsatay. Ha taaban sawirrada hana u dhowaan in ka badan inta loogu talo galay. Xitaa ku neegsashadaadu uma wanaagsana. Ha ka qaadin dhulka dhagax meel ku dhegsan, hana ka goyinin dhirta dhulka ku taal. Ha ku qiijin sigaar, hana ku shidan dab, haddaad sigaar cabtana ka ilaali halka aad ku tuurayso in aanu ku keenin dab qabsada aagga si lama filaan ah. Waxa aad had iyo jeer ku dedaashaa in aad raacdo dawyada loo asteeyay booqashada oo ka ilaali in cagtaadu waddo cusub ka dhex furto aagga booqashada.




Sawirgacmeed: haddii Laasgeel la ilaashan waayo way innaga duuli. Hanad Arts, Photo © HCC, 2020

*Xaggeen ka heli karaa warbixin dheeraad ah?*

Ka eeg degelka internetka ee laasgeelcaves.com amase slmotit.com warbixin joogtaysan oo ku saabsan guud ahaan dalxiiska Jamhuuriyadda Somaliland iyo gaar ahaan goobta Dalxiiska Farshaxanka Dhagaxkuyaalka ee Laasgeel. Ku xidhnow baraha bulshada (twitter, facebook, instgram) ee @laasgeelcaves.

July 2020

*Qoraalkani waxa uu ka mid yahay taxane bille ah ku saabsan barashada dalxiis dalkaaga hooyo, isla markaana lagu degaamaynayo aqoonta dalxiiska iyo arkiyoolajiga oo Afsoomaali ku qoran.*

Dr. Jama Musse Jama waa Guddoomiyaha Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa, waana cilmibaadhe ku hawlan dhaqanka iyo saameynta togan ee uu ku yeelan karo hormarka. Waxa laga la xidhiidhi karaa twitter.com/JamaMusse.

*Bedbaadinta iyo dhowrista Laasgeel waxa Xarunta Dhaqanka ee Hargeysa kala shaqaynaya hay'ado kala duwan oo ay ka mid yihiin Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha, iyo Dalxiiska (Somaliland), Midowga Yurub (EU), iyo Gerda Henkel Stiftung (Germany).*